Jileecu shayga uu galo wuu wanaajiyaa, shaygii laga siibana wuu xumaadaa

Waxaa laga wariyey Caa'isha oo ahayd xaaskii Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri: "Jileecu shayga uu galo wuu wanaajiyaa, shaygii laga siibana wuu xumaadaa".

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu cadeeyey in jileeca iyo dabacsanaata xaga hadalka iyo ficilkuba ay u siyaadiso qurux arimaha, kamaal, iyo wanaag waxayna u dhawdahay in Qofka sidaa suubiya uu dantiisa gaaro. Dabacsaan la`aantu arimaha way ceebaysaa oo xumaysaa waxayna u diidaa Qofka sameeya inuusan dantiisa gaarin ama uu ku gaaro dhib.

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/5796